Highwood Hills
ELEMENTARY SCHOOL

ABUURISTA. CUSBOONEYSIINTA. HORUMARINTA.

Ku yaala xaafad deggan oo ay hareeraha ka xigaan deegaan dabiici ah, Dugsiga Hoose ee Highwood Hills waxa uu tubta ku hagaa carruurta xaga sahminta tignoolajiyada, injineernimada, iyo beeraha iyada oo loo marayo barnaamijkeena farsamada gacanta. Ardaydeenu waxa ay helaan khibrado waxbarasho oo baraatiko ah iyo hagitaanada xirfadlayaasha qeybtaas shaqada si ay ardayda ugu gogol xaaraan dariiqa guusha.



Waxa naga dhigaya kuwo gaar ah:

Barnaamijka Farsamada Gacanta ee Hal-abuurka leh

Waxbarasho Shaqsiga u Gaar ah

Deegaan Badbaado leh, oo Lagu Kobco

Waxaa Naga Go'an Kobcinta Tacliimeed, Habdhaqan, iyo Shucuureed ee Canug Kasta

Canugaaga u hel khibrado waxbarasho oo hal-abuur leh.

Kaalay soo arag iskoolkeenna!

2188 Londin Lane, Saint Paul, MN 55119 | 651-744-3290 | spps.org/highwoodhills

Barnaamijkeena Farsamada Gacanta

Barnaamijka Farsamada Gacanta ee Dugsiga Hoose ee Highwood Hills waa barnaamijka kaliya ee noociisa laga bixiyo Saint Paul. Barnaamijkeena saddex raad-raaca ah, oo lagu soo saaray aragtiyo ka yimid qoysaskeena iskuulka, waxa uu ku takhasusaa barashada farsamada iyo xirfadaha gacanta ee tignoolajiyada, injineernimada, iyo beeraha.

Barnaamijkeenu waxa uu bixiyaa:

- Khibrado bannaanka ah iyo waxbarasho baraatiko ah.
- Hagitaano ay bixinayaan xirfadlayaasha kala duwan ee warshada shaqada ee STEM iyo aagaga farsamada.
- Xoog saarka yool dejinta iyo sameynta qorshaha dugsiga sare kadib.
- Xulashada ardayga ee dhabaha uu daneynayo.

Ardayda waxaa loo dhigaa dhammaan saddexda aag ee farsamada gacanta:

ABUURISTA
Tiknoolajiyada

- **Hordhaca borogaraaminta koodhka**
- **Robotyada**
- **Aasaaska daabacaadda 3D**

CUSBOONEYSIINTA
Injineerinka

- **Injineerinka aasaaska ah oo ay ku jiraan darbi dhiska, taageeridda, iyo tiirarka**
- **Nidaam si gaar ah loogu talagalay dugsiga hoose oo matalaya waxa ay injineeradu adeegsadaan**
- **Isku dhafka cilmiga injineernimada iyo mashaakil xallinta si loo dhammeystiro caqabadaha**

HORUMARINTA
Beeraha

- **Dhaqamada dhaqanka ah ee ku xiran beerashada**
- **Habka beerta-ilaa-miiska**
- **Waxbarashada cuntada ee ku aadan beerashada**
- **Beerista iyo ilaalinta beerta iskuulka iyadoo si wadajir ah looga wada shaqeynayo Beerta Dhallinta**

Deegaan La Kala Duwan Yahay, Badbaado ah oo Lagu Kobco

Qoysasku waxay inta badan noo haystaan in aan nahay guri ka fog guriga, halkaas oo ay og yihiin in ubadkooda ay ku haystaan badbaado laguna taageerayo. Ardaydu waxa ay isu arkaan oo ay maqlaan in ay ka muuqdaan kala duwanaanta shaqaalaheena. Waxaan bixinaa jawiga ugu wanaagsan si ay carruurtu wax ugu bartaan oo ay u koraan tacliin ahaan, habdhaqan ahaan, iyo shucuur ahaanba, anaga oo ka caawinayna in ay guulo ku gaaraan gudaha iyo dibedda fasalka.

Shuraakadeena Aasaasiga

MINNESOTA ACADEMY OF SCIENCE

YOUTH FARM

SCIENCE FROM SCIENTISTS®